



## Warar & Qoraalo: Kooxda muusikiistayaasha PPS oo si aad uga dhex muuqatay horyaalada gobolka; tabarucayaal qurxiyay Lent; waxyaabo dheeraad ah

Wax soo bandhigayaal ka socda Dugsiyada Dadweynaha Portland ayaa ku guuleystay qaybtooda Tartankii Horyaalada Kali-kalida ahaa ee Ururka Waxbarashada Muusikada ee Oregon ee dhawaan lagu qabtay Jaamacadda Pacific ee ku taala Forest Grove.

Laba muusikiiste oo ka socday Grant ayaa guul u soo hooyay qalabkooda muusikada Zoe Beyler oo ku guuleystay qalabka muusikada ee timpani iyo Ben Price oo ku guuleystay qalabka muusikada ee oboe. Randy Zhang oo ka socday Lincoln ayaa ku guuleystay tartanka muusikada ee qalabka viola. Beyler ayaa sidoo kale kaalinta labaad ka galay laba qalabka tartamada muusikada oo kale, mallets iyo orchestral snare. Zhang ayaa kaalinta shanaad ka galay tartanka qalabka muusikada ee violin.

Wax soo bandhigayaasha ka socday PPS ee shanta u sarreya kala galay waxay kala ahaayeen Ursula Larson, Cleveland, oo kaalinta labaad ka galay qalabka muusikada codka gaaban leh ee clarinet; Sam Ellis, oo kaalinta saddexaad ka galay, codke dheer; Annika Phillips, Wilson, oo kaalinta afaraad ka gashay codka mezzo.

Lix ka socday PPS ayaa la geliyay Horyalka Gobolka ee Kooxda Muusikada, oo sidoo kale lagu qabtay Jaamacadda Pacific. Saddex kooxood ayaa galay kaalinta labaad: Kooxda Heesaha Afarta lagu qaado ee codka yar ee isku dhafan ‘mixed vocal’ oo ka socota Grant, Kooxda Hooked on Harmonics ee Grant ee muusikada weyn ee tenor/heesaha ‘bass vocal’, iyo WAV ee Wilson ee codka dheer ee isku dhafan ‘mixed vocal’.

Saddex kooxood oo ka socdo ayaa galay kaalinta saddexaad: Kooxda Muusikada Afarta lagu garaaco ee brass weyn ee Cleveland, Kooxda Muusikada Viola ee Laba-labada loo tumo ee xarkaha yar leh ee Wilson, iyo Kooxda Muusikada xarkaha waaweyn leh ee Wilson.

**Tabarucayaasha oo gacan ka geystay qurxinta Lent:** Qiyaastii 350 oo ah shaqaalaha iyo xubnaha qoyska ee Comcast NBCUniversal oo weheliyaan tabarucayaal, shaqaale iyo arday kale ayaa ku kulmay Dugsiga Lent K-8 Sabtidii si ay gacan uga geystaan dayactirka dhismaha Southeast Portland.

Shaquadu waxay qayb ka ahayd [Maalinta Comcast Cares](#), oo ah dhacdo sanadeed kaasi oo ay shaqaalahu ay tabaruc ka sameeyaan dugsiga iyo ururada aan faa'iido doonka. Markii la joogay Lent, tababarucayaashu waxay dib u rinjiyeeyeen khadadka goobta ciyarta, waxay dayactireen garoonka kubadda kolayga, waxay dib u cusbooneysiyeen qolka macallimiinta, iyaga oo qabtay shaqo kale.

Kormeeraha Guud Guadalupe Guerrero ee PPS Guadalupe Guerrero ayaa ku soo biiray Maamulaha Richard Smith iyo Dillion, astaanta 'mascot' gaarka ah ee kooxda kubadda kolayga ee Portland Pickles

#### Fiiри sawirro buuxa oo ka socda dhacdada Lent

**Grant, Lincoln oo galay tartanka qaranka ee Dastuurka:** Labada awooda ku leh PPS ee ka tirsan tartanka Dastuurka ee Anaga oo Dadka ah "We the People" ayaa markale si xooga uga soo muuqday tartanka qaranka. Grant, oo horyaalka qaranka ku guuleystay sanadkii la soo dhaafay, ayaa gashay kaalinta saddexaad, iyada oo Lincoln kaalinta afaraad ka gashay [horyaalka qaranka](#) ee ka dhacay Washington, D.C.

Grant waxay tartanka qaranka aaday iyada oo ah koox haysata fursada ay ku galaan tartanka 'wild card' ka dib markii kaalinta labaad ka galeen [horyaalada gobolka](#) ee dhacay Janaayo. Lincoln, oo leh koox ardaydeedu inta badan sanadkii labaad dhigtaan dugsiga, ayaa heshay soo bixitaanta tooska ah ee Oregon ka dib markii ay ku guuleysatay horyaalka gobolka.

Grant waxay horyaalka gobolka ku guuleystay 12 jeer iyada oo horyaalka qarankana qaaday afar jeer. Lincoln waxay haysataa 20 horyaal oo gobolka ah iyo lix horyaalada qaranka ah.

**Academic All-State:** Shan kooxood oo ka kale socday PPS ayaa Kaalinta 1 ka galay ciyaarahoodii Abaalmarinada Tacliimeed ee Gobolka oo Dhan ee OnPoint OSAA ee loogu talagalagu gu'ga. Abaalmarida waxaa lagu aqoonsadaa kooxaha kaalinta sare ka galay ciyaaro iyo hawlo kala duwan iyada oo lagu saleynayo qiyaasta dhibcaha la isku daray .

Dugsiga Sare ee Grant wuxuu yeeshay saddex kooxood oo galay Kaalinta 1 marka la eego kooxaha heirka Class 6A: kooxda muusikada oo keentay 3.95 GPA; kooxda heesaha oo keentay 3.94; iyo kooxda ciyaarta softball-ka oo keentay 3.82. Kooxda heesaha ayaa sidoo kale keentay GPA sareysa marka la eego dhammaan heirarka kala duwan.

Kooxda hadalka ee Cleveland ayaa Kaalinta 1 ka gashay heirka 6A iyo dhammaan heirarka kale ee kala duwan iyada oo keentay 3.91 GPA. Madison ayaa Kaalinta 1 ka galay wiilasha kubada tennis-ka ee heirka 6A isaga oo keenay 3.85.

Marka la isku daro kooxahaasi, 35 kooxood oo ka socday ciyaaraha iyo hawlahu gu'ga la qabto ee PPS ayaa galay 10 kaalmood ee ugu sarreeya heerkooda ciyaareed. Si aad u aragto liiska buuxa, fiiri [website-ka abaalmarinada](#).